

COMMUNITY RESOURCE CONNECTIONS OF TORONTO (CRCT)

CRCT waxay taageertaa dadka waaweyn (adults) ee dhibaato xoogani ka hayso maskaxda, si ku dhiiri-gelisa inay cisi iyo sharaf ugu dhex-noolaadaan beesha.

Shaqadayada waxa hogaamiya xeerisyadan:

Xushmo, doorasho xor ah, aaminaad, aayo- ka-tashi, macmiilka oo hogaamiya baahidiisa. Is-la-qabasho, Fursado helitaan, caddaalad iyo sinnaan. CRCT, waxay isku taxalujisaa inay baadho, fahamto, dadka ka wacyi-geliso oo qiimayso waayo-arragnimada ay ka heshay dhaqanka iyo bulshaynimada dunida. Shaqadayadu, waxay ku dhisan tahay hab aan lahayn midab takoor iyo dulmi toona.

Barnaamijyadayada

- Adeega Taageerada Beesha (Kooxaha bariga iyo galbeedka) Barnaamijka Qoyska Shaqaale u gaar ah afafka Somaliga iyo Tamilka
- Barnaamijka Wacyi-Gelinta Caafimaadka (Health promotion)
- Barnaamijka la Xidhiidhka Guryaha Ku-meelgaadhka ah ee Haweenka (HOP)
- Taageeridda Dadka ay sharciga Isku Dhaceen ee ka bukaanka maskaxda.

Helitaanka iyo Sinaanshaha:

CRCT waxay ballan-qaaday inay la shaqayso dadka ay carqlado ka hortaagan yihiin adeegyada, gaar ahaan kuwa ay sababeen, hoy la'aanta, sharciga oo ay isku dhaceen, sinjiga, dhaqanka, dhalashada, nooca galmada iyo afka-garasho la'aanta.

CRCT waa hay'ad beeled aan macaash samayn, asxaan-fal ah oo u adeegeysey dadka madaxa laga hayo ee ku nool aaga Toronto in ka badan 30 sano.

Waxan caawinnaa dadka waayeeelka ah (adults) ee isticmaala habka caafimaadka maskaxda. CRCT waxa maal-geliya Wasaaradda Caafimaadka iyo Deryeelka Waqtiga Dheer ee Ontarityo. Waxa kale oo kaba maal-gelinteeda: United Way of Toronto, Wasaaradda Hiddaha ee Kanada, Kilaabka Rotaryga ee Toronto, EJLB Foundation, Ontario Trillium Foundation, City of Toronto – access and equity.

Lambarka Diiwaan-gelinta Asxaan-falka
#118871128 RR0001

Iyadoo laga mahad-naqayo tabaruca, waa la aqbalayaa.

Warar dheeraad ah waxad ka heli kartaa shabakeddayada Internetka ee ah www.crct.org.



Community
Resource
Connections
of Toronto



Community
Resource
Connections
of Toronto

**BARNAAMIJKA LA XIDHIIDHKA GURYAHA
KU-MEELGAADHKA AH EE HAWEENKA**



MUXUU YAHAY BARNAAMIJKA GACAN-U-FIDINTA HOYGA KU-MEELGAADHKA AH EE HAWEENKA? (HOP)

Barnaamijka Gacan-u-fidinta Hoyga Haweenku, waa barnaamij ay leedahay (CRCT) oo ah hay'ad aan macaash-doon ahayn una adeegta beesha oo taageerta dadka qaba xanuunada maskaxda oo leh waayo-aragnimo ka badan 30 sanno oo ay u adeegaysey degaanka Toronto. Waa barnaamij ku salaysan inu caawiyo dadka beesha ee qaba xanuunada madaxa, gaar ahaan haweenka aan hoyga lahayn een qabsan karin hawlmaalmeedkooda.

Barnaamijkan waxa la hirgeliyey, kadib markay korodhay ogaalka ay dadweynuhu ogaadeen in tirada dadka aan hoyga lahayn ee qaba xanuunnada madaxu sii kordheyso.

Waxa (CRCT) maal-gelisasey Wasaaradda Caafimaadka sannadkii 1988kii.

(CRCT) waxay leedahay maareeyaha barnaamijka, shaqaale ka shaqeeya xarumaha iyo qaar kale oo la shaqeeya ama u adeega haweenka jidadka jooga. Shaqaalahayagu waxay ka kala yimaadeen meelo kala gedisan isla markaasna, waxay qaataan tababaro khuseeya mawduucyo kala duwan oo ay ku jiraan caafimaadka maskaxda, raysashada, arrimaha haweenka iyo u doodistooda.

XIDHIIDHIN:

Qof kasta oo dareemaya in dhibaato ka haysato dhinaca maskaxda ayaa isagu nala soo xidhiidhi kara. Waxa kale oo noo soo diri kara asxaabtiisa, qoyskiisa ama guud ahaanba shacbiga. Qofku waa inu buuxiyaa shuruudaha looga baahan yahay isla markaasna u baahan yahay taageero joogta ah.

Waxannu aqballaa dadka nalooga soo diro hoy ay haweenka hoyga li'i degaan, ama meelaha kale ee looga adeego. Haddaad doonto inad qof adeegan u baahan nala soo xidhiidhiso, waxad la soo hadshaa maamulka (HOP) (416) 482-4103.

MAXAANNU QABANNA?

(HOP) waxay bixisaa taageero joogta ah, u doodid, iyo is-ku dubbaridka adeegyada beesha- kuwaas oo badanaa lagu magacaabo (case Management);

Shaqaalaha gacan-u-fidinta dad jidadka seexda (Street outreach workers) waxay taageeraan haweenka dibjirka ah ee jidadka seexda.

Shaqaalaha hoyga haweenku (Hostel Outreach Workers) iyaguna waxa ay taakulayn noocaan oo kale ah u fidiyaan haweenka deggen guryaha ku meel gaadhka ah.

Waxannu Rumaysannahay

- In dadweynuhu xaq u leeyihiin guryo la awoodi karo oo bermen ah;
- In dadweynuhu xaq u leeyihiin in ay isticmaali karaan adeegyada ay u baahan yihiin;
- In dareenka macmiisha, qiimayntooda iyo baahidoodu ay wax kasta ka muhiimmsan yihiin.

MAS'UULIYADDA SHAQAALAHA WAXA KA MID AH:

- In ay xidhiidh wanaagsan la yeeshaan shaqaalaha xarumaha hoyga kumeel- gaadhka ah iyo kuwa hay'adaha kaleba;
- Inay xidhiidh la sameeyaan macmiisha;
- Inay ka hortagaan waxii dhib ku ah, dhibaatooyinka ba'anna ka taageeraan;
- Inay qiimeeyaan baahida iyo doorashada macmiisha;
- Inay la qorsheeyaan kana caawiyaan sidii ay macmiishu u gaadhi lahaayeen himiladooda;
- Inay macmiisha baraan xirfadaha ay ku gaadhi lahaayeen himiladooda;
- Inay macmiisha u gudbiyaan adeegyada una doodaan marka loo baahdo;
- Inay dabajoogaan taakuleeyaanna muddada ay tageerada u baahan yihiin;
- In ay soo jeediyaan waxii talooyin ama tusaale ah ee ka waramaya barnaamijkayaga oo ay u bandhigaan hay; adaha kale een la shaqayno;
- Qorshaynta iyo isku ururinta adeegyada, ogaanshaha ama magacaabista waxii baahi ama dhibaatooyin ka yimaadda adeegyadaada iyo u doodista sidii lagu horumarin lahaa ama kuwo cusub loo hirgelin lahaa.

XIL-QARINTA

Dhamaan shaqaalaha(CRCT), ardayda iyo tabarucayaasha, waxay ku qasba yihiin inay saxeeaan siyaasadda xil-qarinta. Warbixima kuu gaarka ah, waanu kuu ilaalin doonnaa, cidna u gudbinayno adoon ogolaan, haddaanu sharci nagu qasbin. Haddaba, si ad wax uga ogaato siyaasaddayada xil-qarinta waxaad la soo hadashaa saarkaalka xil-qarinta (416) 482-4103.